



# Aasaasiyaadka Caymiska Caafimaadka

WAX KASTA EE AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD OGGAATID EE KU  
SAABSAN CAYMINTA





# Tusmada

<b>4</b>	Washington Healthplanfinder™
<b>5</b>	Ereyada Muhiimka ah
<b>6-7</b>	Aasaasiyaadka Qorshaha Caafimaadka
<b>8</b>	Dheefaha
<b>9</b>	Taageero Maaliyadeed
<b>10</b>	Washington Apple Health (Medicaid)
<b>11</b>	Doorashada Qorshe Caafimaad
<b>12-14</b>	Cascade Care
<b>15-16</b>	Goorta La Codsanayo
<b>17</b>	Liisto-hubineedda Codsashada
<b>18-23</b>	Sida loo Codsado
<b>23</b>	Nala Soo Raac!

# Washington Healthplanfinder™

## Waa Maxay Washington Healthplanfinder?

Washington Healthplanfinder waa halka barta internet-ka lagaga dukaameysto qorshaha caafimaad ee Washington. Dadka gobolka Washington waxay heli karaan qorshe caafimaad oo ugu shaqeeya mareykanka oo dhan.

Washington Healthplanfinder wuxuu bixiyaa qorsheyaal iyo kayd aan laga heli karin meel kale. Qorsheyaasha Cascade Care waxay bixiyaan adeegyo badan iyo kayd marka loo eego qorsheyaal kale oo badan. Barnaamijyada kaydka sida canshuur dhaafka waxay yareyn karaan kharashka lacagahaaga joogtada ah ee caymiska. Dheefahan kama heli doontid meel kasta oo kale.

## Sideen u Adeegsadaa Washington Healthplanfinder?

Way sahlan tahay in la codsado qorshe caafimaad iyadoo la adeegsanayo Washington Healthplanfinder. Waxaad iska diiwaangelin kartaa oo aad ka dukaamaysan kartaa wahealthplanfinder.org, app-ka WAPlanfinder ama telefoonka.



Booqo Mareegtadeenna  
**wahealthplanfinder.org**

## Su'aalo? Wac Taageerada Macmiilka.

Xarunteenna Taageerada Macmiilka waxay taageero ku bixisaa in ka badan 200 luuqadood.



Telefoonka: **1-855-923-4633**  
TTY: **1-855-627-9604**

# Ereyada Muhiimka ah

Ereyadan Waxay Muhiim U Yihiin Fahamka Qorshahaaga Caafimaadka.

## ► Lacagaha caymiska ee joogtada ah

Lacagahaaga caymiska ee joogtada ah waa lacagta aad bil kasta ku bixiso qorshahaaga caafimaadka. Waa in aad bixisaa lacagahaaga caymiska ee joogtada ah xitaa haddii aadan helin wax adeegyada daryeel caafimaad ah.

## ► Kharash Wadaag

Kharash-wadaag waxaa loola jeedaa qaddarka kharashaadka daryeelka caafimaad ee aad bixiso. Ereyadan waxaa ku jira qaddarka laga jari karo, caymiska-la-wadaago iyo lacag-bixinnada caymiska la wadaago.

## ► Laga jari karo

Qadarkaaga laga jari karo (deductible) waa qaddarka ay tahay in aad ku bixiso daryeelka ka hor inta qorshahaaga caafimaadka uusan bilaabin in uu kharashka kula wadaago. Qaddarkaaga laga jari karo ayaa wuxuu bilaabanayaa bilowga sannad kasta.

## ► Lacag-bixinta caymiska ee la wadaago

Lacag-bixinta caymiska ee la wadaago waad qaddarka aad ku bixinayso adeegga daryeelka caafimaad la caymiyay. Lacag-bixinta caymiskaaga ee la wadaago ayaa waxaa la filayaa marka aad adeegga hesho.

## ► Caymiska-la-wadaago

Caymiska-la-wadaago waa saamigaaga ee kharashka adeegga daryeelka caafimaadka ee la caymiyay. Waxaad bilaabi doontaa in aad bixiso lacagaha caymiska la wadaago ka-dib marka aad bixiso lacagaha caymiska laga jari karo ee qorshahaaga caafimaadka.

## ► Lacagta-Jeebka-Laga-Bixiyo

Kharashaadka lacagta jeerka laga bixiyo waa waxa aad ku bixiso daryeelkaaga caafimaadka. Waxaa ku jiri kara qaddarka laga jari karo, caymiska-la-wadaago iyo lacag-bixinnada caymiska la wadaago. Qaddar kasta ee uusan caymin qorshahaaga caafimaadka waa kharashaadka jeebka-laga-bixiyo.

## ► Shabbakada

Shabbakada waa liiska adeeg bixiyeyaasha qorshahaaga caafimaadka uu caymiyo. Adeeg-bixiyeyaasha shabbakada ku jira waxaa ansaxiyey qorshahaaga caafimaadka. Adeeg-bixiyeyaasha aan shabbakada ku jirin ma ansaxin qorshahaaga caafimaadka.

# Aasaasiyaadka Qorshaha Caafimaadka

## Waa Maxay Qorshe Caafimaad?

Waxaad sannad walba iibsataa qorshe caafimaad lacala haddii adiga ama qoyskaaga ay u baahan yihiin daryeel caafimaad. Shirkada caymiska ayaa bixisa qayb ka mid ah kharashka daryeelka caafimaadka marka aad leedahay qorshe caafimaad.

## Maxay Tahay Sababta Aan Ugu Baahanahay Qorshe Caafimaad?

Xitaa dadka caafimaadqaba waxay adeegsadaan nidaamka daryeelka caafimaad. Helidda qorshe caafimaad ayaa xaqiijinaysa in kharashaadka daryeelka caafimaad ay noqdaan kuwo la awoodi karo marka aad awoodo. Waxaad heli kartaa daryeel ka hortag si aad u caafimaadqabto haddii aad caafimaadqabto. Waxaad si degdeg ah u heli kartaa daaweyn haddii aadan caafimaadqabin. Qorshaha caafimaadka ayaa bixiya hab la awoodi karo oo lagu heli karo daryeel caafimaad marka aad u baahan tahay.



### Qorshe Caafimaad oo loogu talagalay Mustaqbalka

Marnaba ma oggaan doontid marka aad u baahan doontin in aad dhakhtarka u tagto. Yeelashada qorshe caafimaad ayaa huiin aad awoodi karto in aad hesh daryeel caafimaad marka aad u baahan tahay.

Xitaa haddii aad caafimaadqabto, qorshaha caafimaadkaaga ayaa kaa caawin kara in aad caafimaadqabto.



### Maalgasho Caafimaadkaaga

Kharashaadyada daryeelka caafimaadka waxay noqon karaan kuwo qaali ah qorshe caafimaad la'aan. Booqashooyinka caadiga ah si dhaqso ah ayay u kordhaan. Kharashka daryeelka dhaawaca kediska ah ama jirooyinka waaweyn waxay dhammeyn karaan kaydkaaga.

Waxaad mustaqbalka dhaqaaleysan kartaa wax badan adiga oo in yar ku kharash-gareyn kara qorshe caafimaad oo maanta ah.

## Waa Maxay Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo?

Markii la meelmariyey Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo, gobolka Washington wuxuu abuurey ama sameeyay Washington Healthplanfinder. Yoolka Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo waa in laga dhigaa kharashaadka daryeelka caafimaad mid yar. Dad sidii hore ka badan ayaa ku heli kara qorshe caafimaad waxyar ama kharash la'aan. Xaaladaada waxay xaq kuu siin kartaa in aad hesho Washington Apple Health (Medicaid) ama dheefo yareeya qaddarka aad ku bixiso caymiska.

Waxaad ka codsan kartaa caymis caafimaad bilaash ah ama qiimahiisu yar yahay wahealthplanfinder.org iyo app-ka WAPlanfinder.

## Ka Waran Haddii Aanan Helin Qorshe Caafimaad?

Qorshe caafimaad la'aan waxaad bixin doontaa dhammaan kharashka daryeelka caafimaadka. Tallaalada hargabka waxay ku kici karaan \$50. Joogitaanka cusbitaalka muddo saddex maalmood ah waxay ku kici kartaa tobannaan kun. Daaweynta cudurka kansarka waxay isku noqon kartaa boqolaal kun.

Waxaad kaloo heli kartaa qanaax canshuureed haddii aanan lagu caymin. Gobolka Washington, waxaad mid u helaysaa qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga.

## Muxuu Yahay Kharashka Daryeelka Ku Baxaya?

Kuwan waa qaar ka mid ah daaweynta caamka ah iyo kharashka ku baxaya. Qorshaha caafimaadkaaga ayaa kula wadaagi kara kharashaadkan oo kale.

DAAWEYNTA:	KHARASHKA
Qalliinka Wadnaha	\$78,585
Naaso-cabbir	\$263
Qalliinka Laf-dhabarta	\$13,255
Baaritaanka Malawadka	\$1,484
Qalliinka Dhalhada	\$18,098
Booqashada Daryeelka Deg-degga ah	\$181
Baaritaannada (loogu talagalay dhallinyarada)	\$117
Booqashada Qolka Xaaladaha Degdegga ah	\$579

# Dheefaha

## Muxuu Caymiyaa Qorshaha Caafimaadka?

Dhammaan qorsheyaasha caafimaadka waxay caymiyaan tobankan dheefood ee caafimaadka aasaasiga ah. Qorsheyaasha qaar, sida qorsheyaasha Cascade Care, waxay caymiyaan wax badan.

### Dheefaha Caafimaadka Aasaasiga ah

- Booqashooyinka takhtarka iyo joogitaanka cusbitaalka
- Booqashooyinka Qolka Xaaladaha Degdegga ah
- Daryeelka Hooyonnimada
- Adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha
- Daawooyinka la isku qoro
- Adeegyada bogsashada marka aad dhaawacanto
- Baaritaannada shaybaarka
- Adeegyada ka-hortagga
- Maareynta xaaladaha daba-dheeraada
- Daryeelka caafimaadka carruurta

### ► Diidmo Dhan Ma Jirto

Laguuma diidi doonno caymis sababo la xiriira xaalado horey u jiray.

### ► Daryeelka Ka Hortagga Bilaashka ah

Adeegyada sida baaritaannada iyo tallaallada si buuxdo ayaa loo caymiyay.

### ► Cascade Care

Waxaad heli kartaa adeegyo iyo dhaqaaleyn ka badan intii hore marka aad leedahay qorshaha Cascade Care.

### ► Tayada Daryeelka

Qorsheyal caafimaad badan ayaa bixiya daryeel tayadiisu sarreyso marka la eego waxa aad helayso marka aadan caymis lahayn.

# Taageero Maaliyadeed

## Waa Maxay Canshuur Dhaaf?

Canshuur dhaafku wuxuu yareeyaa qaddarka aad ku bixiso qorshahaaga caafimaadka bil kasta. Waxaa bixiya dowladda waxaanna lagu dabakhaa lacagaha joogtada ah ee qorshahaaga caafimaadka. Canshuur dhaafka ayaa keliya la heli karaa iyadoo loo marayo Washington Healthplanfinder.

## Kumaa Heli Kara Canshuur Dhaafka?

Qaddarka canshuur dhaafka ee aad helayso waxay ku xiran tahay dakhligaaga iyo inta qof ee uu ka kooban yahay qoyskaaga. Sida dakhliga qoyskaaga u hooseeyo, waa sida ay u badan tahay canshuur dhaafka aad xaqa u yeellan karto. Qaddarkan ayaa waxaa la xisaabiyaa marka aad isku qorto. Waxaad xaqa u yeellan kartaa canshuur dhaaf haddii ay waxyaabahan sax yihiin:

- ▶ Haddii aadan xaqa u lahayn Washington Apple Health (Medicaid) ama Medicare.
- ▶ Haddii aadan lahayn caymis loo marayo shaqadaada ama barnaamij kale oo ay dowladdu leedahay.
- ▶ Haddii aad tahay muwaadin u dhashey Mareykanka ama qof si sharci ah ku jooga dalka Mareykanka kuna nooshahay Washington.
- ▶ Haddii aad xaas tahay ama xaas leedahay, oo aadan xareyn canshuur celinta Guursadey Si Kala-gooni ah u Xareynaya.

## Waa Maxay Cascade Care Savings?

Barnaamijka Cascade Care Savings wuxuu yareeyaa kharashka lacagaha joogtada ah ee qorshahaaga caafimaadka. Haddii aad xaqa u leedahay, gobolka wuxuu bixin doonaa qayb ka mid ah lacagahaaga caymiska ee joogada ah.

## Kumaa Heli Kara Kaydka Cascade Care Savings?

Waxaad xaqa u yeellan kartaa Cascade Care Savings haddii waxyaabahan ay run yihiin:

- ▶ Haddii dakhligaaga uu ka hooseeyaa 250% ee Heerka Saboolnimada Federaalka.
- ▶ Xaqa uma yeellan doontid Washington Apple Health (Medicaid) ama Medicare.
- ▶ Haddii aad ku qoran tahay qorshaha Cascade Care ee (Qalinka)Silver ama (Dahabiga ah)Gold.
- ▶ Haddii aad xaqa u leedahay canshuur dhaaf, waxaad aqbashey qaddarka buuxa ee aad heli karto.

# Washington Apple Health (Medicaid)

## Waa Maxay Apple Health?

Apple Health waa magaca Medicaid loogugu yeero gobolka Washington. Wuxuu caymiyaa dhammaan dheefaha caafimaadka ee aasaasiga ah. Dad badan ayaa lacag la'aan ku heli kara Apple Health. Qaar waxaa dhici karta in ay bixiyaan lacag si joogto ah bil kasta loo bixiyo.



Waxaad codsan kartaa Apple Health waqti kasta iyadoo loo marayo Washington Healthplanfinder.

## Kumaa Heli Kara Apple Health?

Waxaad heli kartaa Apple Health haddii waxyaabahani ay run yihiin. Sameyso akoon ama gal Washington Healthplanfinder haddii aadan garaneyn haddii aad xaq u leedahay.

- ▶ Dakhligaagu uu ka hooseeyo 138% ee Heerka Saboolnimada Federaalka.
- ▶ Ku nooshahay Washington.
- ▶ Aad ka yar tahay 65.

# Doorashada Qorshe Caafimaad

## Helidda qorshaha saxda ah waxay noqon kartaa mid fudud.

Waxaa jira waxyaabo badan oo loo baahan yahay in laga fikiro marka la dooranayo qorshe caafimaad. Waxaad xaq u yeellan kartaa qorsheyaal badan, laakiinse ma hubtid kuwa ugu wanaagsan baahiyadaada. Qorsheyaasha kala duwan waxay bixiyaan dheefo kala duwan. Qorsheyaasha Cascade Care waxay adeegsadaan kharash-wadaag caadi ah si ay u bixiyaan dheefaha ugu wanaagsan ee heer bireed kasta. Su'aalaha hoos ku xusan ayaa kugu hagi kara dhanka qorshaha caafimaadka saxda ah.



- ▶ **Immisa ayaan bixin karaa bil kasta?**  
Lacagaha caymiska ee joogtada ah ee bil kasta way ku kala duwan yihiin qorsheyaasha caafimaadka.
- ▶ **Miyaan u baahanahay in aan doorto dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah?**  
Qorsheyaasha qaarkood ayaa mid kuu sameeya.
- ▶ **Dhakhtarkeyga hadda miyuu ku jiraa shabakada qorshaha?**  
Hubso in uu caymiska ku jir dhakhtarkaaga hadda.
- ▶ **Miyaan filayaa wax kharashyo caafimaad oo waaweyn sannadka soo socda?**  
Waxaad dooni kartaa caymis badan haddii aad filayso cunug ama kharash kale oo badan.
- ▶ **Sidee bay u fududahay in la iska beddelo dhakhaatiirta?**  
Waxaad laga yaabaa in aad dooneyso in aad kala beddelato dhakhaatiirka mustaqbalka.
- ▶ **Ma jiraa wax laga jari karo?**  
Waa in aad ka soo baxdaa shuruudaha waxa la iska jari karo ka hor inta qorshahaagu uusan wadaagin kharashaadkaaga.
- ▶ **Gharama za kutoka mfukoni ni zipi kwa bima hii?**  
Gharama za kutoka mfukoni zinaongezwa na ziara za mara kwa mara.
- ▶ **Sidee ayuu qorshahani ula tacaamulaa booqashooyinka Qolka Xaaladaha Degdegga ah?**  
Ogow waxa la sameeyo lacala haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.
- ▶ **Miyaan u baahanahay gudbin qoraal ah si aan u arko dhakhtar takhasusle ah?**  
Qorsheyaasha qaarkood waxay u baahan yihiin gudbinno qoraal ah.

# Cascade Care

## Waa Maxay Qorsheyaasha Cascade Care?

Qorsheyaasha Cascade Care waa nooc ka mid ah qorshaha Qualified Health Plan oo laga heli karo Washington Healthplanfinder. Waxay caymiyaan dheefaha caafimaadka aasaasiga ah waxayna bixiyaan adeegyo iyo kayd badan marka loo eego qorsheyaal badan.

Waxaa jira laba nooc oo qorsheyaasha Cascade Care ah: Qorsheyaasha Cascade iyo qorsheyaasha Cascade Select. Qorsheyaasha Cascade Select waa in ay ka soo baxaan jaangooyooyin sare. Waxay bixiyaan tayo iyo qiimo dheeraad ah marka loo eego qorsheyaasha kale.



## Maxay Tahay Sababta Aan u Dooranayo qorshaha Cascade Care?

Qorsheyaasha Cascade Care ayaa caymis badan ku bixiya kharash yar. Waxay caymiyaan adeegyo badan marka loo eego qorsheyaasha intooda badan ka hor inta aadan ka soo bixin waxa laga jari karo. Kuwani waxaa ka mid ah daryeelka aasaasiga ah, adeegyada caafimaadka dhimirka, daawooyinka guud iyo kuwo kaloo badan.

Waxaad kaloo wax kaaga haraya kharashyada jeebka-laga-bixiyo. Celcelis ahaan, waxa lagaa jari karo waa wax \$1,000 ka yar marka aad doorato qorshaha Cascade Care.

## Sidee Ayay Qorsheyaasha Cascade Care u Shaqeeyaan?

Qorsheyaasha Cascade Care waxay adeegsadaan nakh-shadda kharash-wadaagga caadiga ah. Tani wuxuu macnaheedu yahay dhowr waxyaabood. Marka koowaad, kharashyada jeebka-laga-bixiyo waxay noqonayaan kuwo ay ka siman yihiin shirkadaha caymiska. Dhammaan qorsheyaasha Cascade Care ee heer bireed kasta waxay wadagaan waxa laga jari karo, lacag-bixinnada caymiska ee la wadaago iyo caymiska la wadaago oo isku mid ah.

Marka labaad, qorsheyaasha Cascade Care waxay wadaagaan caymis isku mid ah. Waxay caymiyaan adeegyo isku mid ah ka hor inta waxa laga jari karo aan laga soo bixin. Waad nasan kartaa adigoo og in aad leedahay caymiska ugu wanaagsan ee la heli karo.

## Ikhtiyaaro Badan. Qiimo Badan.

Qorsheyaasha Cascade and Cascade Select waxay ku siinayaan ikhtiyaaro badan iyo qiimo badan. Nakhshadooda kharash-wadaaga caadiga ah waxay hubinaysaa in aad hesho caymiska ugu wanaagsan ee aad heli karto.

Qorsheyaasha Cascade Care ayaa kelita la heli karaa iyadoo loo marayo Washington Healthplanfinder. Soo gal akoonkaaga si aad u eegto in aad xaq u leedahay iyo in kale.



## Qorsheyaasha laga heli karo Washington Healthplanfinder

	Qorshayaasha Aan Ahayn-Cascade	Qorshayaasha Cascade	Qorsheyaasha Doorashada Cascade
Xaq u leh canshuur dhaaf	✓	✓	✓
Xaq u leh Cascade Care Savings		✓	✓
Qorshaha Caafimaadka Qualified (waa in uu ka soo baxaa heerarka tayada)	✓	✓	✓
Wuxuu caymiyaa dhammaan tobanka dheefood ee caafimaadka aasaasiga ah	✓	✓	✓
Qorsheyaasha kharash-wadaaga jaango'an (waxay wadaagaan ka-jarid isku mid ah, lacag-bixinno la wadaago iyo caymis la wadaago)		✓	✓
Wuxuu caymiyaa daryeelka aasaasiga ah, daryeelka degdegga ah, daryeelka caafimaadka dhimirka, daawooyinka guud iyo in badan ka hor inta aan laga soo bixin inta laga jari karo		✓	✓
Waxaa keliya bixiya Washington Healthplanfinder		✓	✓
Lagu bixiyo degmo kasta ee ku taalla gobolka Washington	✓	✓	

# Goorta La Codsanayo

## Goormeen Codsan Karaa Qorshe Caafimaadka?

Waxaad codsan kartaa qorshe caafimaad inta lagu guda jiro isqoritaanka furan. Isqoritaanka furan waa waqtiga sannadka ee qorsheyaasha Qualified Health Plans iyo Qualified Dental Plans laga iibsano Washington Healthplanfinder. Wuxuu bilowdaa 1-da Nofembar ee sannad kasta.

## Ka Waran Haddii Aan Caymis u Baahanahay Kahor Isqoritaanka Furan?

Isbeddellada nolosha qaarkood ayaa kuu oggolaanaya in aad isku qorto qorshe caafimaad waqti kasta oo sannadka ah. Tani waxaa loo yaqaanaa isqoritaanka gaarka. Waxaad codsan kartaa isqoritaanka gaarka ee ilaa 60 maalmood ka-dib marka ay dhacdo dhacdada nololeed ee u qalanta.

### Dhacdooyinka Nolosha ee U-qalma

- Guur
- Gelidda iskaashi guri
- Dhalasho
- Korsasho ama daryeel korsasho
- Hawlgab waqti hore ah
- Luminta ku tiirsanaan ama xaalad ku tiirsanaan oo sabab u ah dhimasho, furiin ama kala-tagis sharci ah
- Isbeddelka dakhliga
- Luminta caymis caafimaad kale
- Luminta caymiska COBRA ee bilaashka ah
- U-guuridda Washington
- U-guuridda degmo cusub
- Beddelka dhalashada ama xaaladda joogitaanka sharciga ah
- Xabsi ka sii deyn
- Helidda amar maxkamadeed (oo uu ku jiro taakuleynta carruurta)

## Qoysaska Dakhligoodu Yar Yahay

Qoysaska dakhligoodu yar yahay waxay waqti kasta codsan karaan isqoritaanka gaarka ah. Dhacdada nolosha ee u-qalanta looma baahna. Waa in aad sameysaa in ka badan 250% ee Heerka Saboolnimada Federaalka si aad u hesho dheeftan.

## Shakhsiyaadka AI/AN iyo Xubnaha Qabiilka

Xeerarka isqoritaanka laguma dabakhayo xubnaha qabiilka iyo saamileyda Shirkadda Asaliga ah ee Alaska. Waxaad isku qori kartaa waqti kasta oo sannadka ah. Waxaad kaloo beddeli kartaa qorshahaaga hal jeer bishii haddii aad doorato.



# Liisto-hubineedda Codsashada

## Maxaan U Baahanahay Si Aan u Codsado?

Washington Healthplanfinder wuxuu u baahan yahay xoogaa macluumaad aasaasi ah oo adiga kugu saabsan marka aad codsaneyso qorshe caafimaad. Isticmaal liisto-hubineedda hoos ku xusan si aad u habsato in aad haysato waxa aad u baahan tahay.



### **Magacyada Sharciga ah iyo Taariikhaha Dhalashada**

Waxaad u baahan tahay magaca sharciga ah iyo taariikhda dhalashada ee qof kasta ee codsanaya caymiska.



### **Lambarrada Damaannada Bulshada**

Diyaari lambarka damaannada bulshada ee qof kasta ee codsanaya haddii ay leeyihiin. Weli waad codsan kartaa haddii aadan lahayn.



### **Xaaladda Dadka Aanan Muwaadinka Ahayn**

Waxaan u baahan karnaa in aan oggaano xaaladaada haddii aad tahay qof aan muwaadin ahayn. Adiga iyo xubnaha qoyskaaga waxay weli heli karaan caymiska haddii sidan tahay xaaladda.



### **Xaaladda Dakhliga iyo Xareynta Canshuurta**

Soo ururi macluumaad dakhli kasta ee aad ka hayso qof kasta ee codsanaya. Tani waxaa ka mid ah foomamka W-2 iyo canshuur celinnada.



### **Macluumaadka Kale ee Caymiska**

Waxaad haysan kartaa ikhtiyaaro kale oo caymiska caafimaadka ah, sida Medicare, Tricare ama caymiska shaqada ku saleysan. Soo ururi macluumaadkan marka aad codsato.

# Sida loo Codsado

**Waxaan Haystaa Wax Kasta ee Aan u Baahanahay! Ka Waran Hadda Maxaa Dhacaya?**

Waxaad ka codsan kartaa caymiska wahealthplanfinder.org, app-ka WAPlanfinder ama telefoonka.



**Iska-diiwaangeli Barta Internet-ka  
wahealthplanfinder.org**

Samee akoon, iibso qorsheyaal caafimaad oo ka hel macluumaad caawimaad leh wahealthplanfinder.org.



**Naga Soo wac  
1-855-923-4633**

Taageerada Macaamiisha ayaa laga heli karaa telefoonka min 7:30 subaxnimo (a.m.) ilaa 5:30 galabnimo (p.m.) Isniin ilaa Jimco.

## Dhagsii. Isbarbardhig. La Caymiyey.

Way fududahay in la helo qorshaha saxda ah ee baahiyadaada iyadoo loo marayo Washington Healthplanfinder. Haddii aad adeegsato wahealthplanfinder.org ama app-ka WAPlanfinder, qaad tallaabooyinka fudud.

# 1

### Dukaameyso oo isbarbardhig.

Bixi da'daada, isticmaalka sigaarka iyo dakhliga la qiyaasey. Waxaad heli doontaa liiska qorsheyaasha caafimaadka ee aad heli karto iyo lacagahooda caymiska ee joogtada ah.

# 3

### Dooro qorshe.

Waxaad yeelan kartaa ikhtiyaaro badan oo ku saleysan xaaladaada. Dooro qorshaha ugu wanaagsan baahiyadaada iyo baahiyada qoyskaaga.

# 2

### Codso.

Geli macluumaad dheeri ah, sida xaaladda xareynta canshuurta iyo ilaha dakhliga. Tani waxay kuu oggolaanaysaa in aad aragto haddii aad u-qalanto taageero maaliyadeed, Washington Apple Health (Medicaid) ama Qorsha Qualified Health Plan.

# 4

### Caymis hel.

Marka aad xaqiijiso qorshaha caafimaadka ee aad dooratey, dhowaan waa lagu caymin doonaa. Bixi qaansheegtaada joogtada ah ee caymiska ee ugu horreeya marka aad hesho si aad uu kuugu bilowdo caymiska. Waxaad kaarka caymiska ka heli doontaa shirkadda aad dooratey.

## Hel Taageerada Codsigaaga.

Waxaan la hawlgalnaa khubarro ku sugan gobolka oo dhan kuwaas oo kugu hagi kara hannaanka isdiiwaangelinta. Khuburradan waxaa loo yaqaanaa dallaalo iyo hageyaal. Dadkani waxay ka jawaabi karaan su'aalahaaga ku saabsan qorsheyaasha caafimaadka ama sida la isu diiwaangeliyo. Waxay sidoo kale kuu sheegi karaan haddii aad xaq u leedahay taageero maaliyadeed.

Taageerada laga helo dallaalada iyo hageyaasha caadi ahaan waa bilaash. Ka raadi degaankaaga mid degaankaaga joogo halkan wahealthplanfinder.org ama app-ka WAPlanfinder.

## **Xarumaha Isqoritaanka ee Jooga Hageyaasha iyo Dallaalada ee Magaalo Ahaan**

### **Bellingham**

PCF Insurance Services  
2200 Rimland Dr., #305, Bellingham, WA 98226  
*Telefoonka:* 1-360-734-1173  
*Email-ka:* Keith.Wallace@pcfins.com

---

### **Everett**

Health Insurance Solutions NW, LLC  
7003 Evergreen Way, Suite B, Everett, WA 98203  
*Telefoonka:* 1-425-252-5105  
*Email-ka:* neil@his-nw.com

---

### **Federal Way**

Public Health Seattle & King County  
1640 S 318th Place, Federal Way, WA 98003  
*Telefoonka:* 1-800-756-5437  
*Email-ka:* chap@kingcounty.gov

---

### **Kennewick**

Advisor Health Benefits Group  
1446 Spaulding Ave, Suite 302, Richland, WA 99352  
*Telefoonka:* 1-509-524-9611  
*Email-ka:* kevin@advisorhealthbenefits.com

---

### **Seattle**

Financial Designs  
2723 California Avenue SW, Seattle, WA 98116  
*Telefoonka:* 1-425-392-7390  
*Email-ka:* cmclure@financialdesignsinsurance.com

## **Spokane**

Better Health Together Enrollment Center  
157 S Howard, Ste 300, Spokane, WA 99201  
*Telefoonka:* 1-509-370-5605  
*Email-ka:* [bhtnavigatorstaff@BetterHealthTogether.org](mailto:bhtnavigatorstaff@BetterHealthTogether.org)  
*Mareegto:* [www.betterhealthtogether.org/navigators](http://www.betterhealthtogether.org/navigators)

---

## **Tacoma**

FND Insurance & Financial Services, LLC  
5515 Steilacoom Blvd SW, Suite 122, Lakewood, WA 98499  
*Telefoonka:* 1-253-302-5579  
*Email-ka:* [teamfnd@fndinsurance.com](mailto:teamfnd@fndinsurance.com)

---

## **Vancouver**

Applied Team Insurance  
8513 NE Hazel Dell Avenue, Suite 101, Vancouver, WA 98665  
*Telefoonka:* 1-360-726-6092  
*Email-ka:* [marlena@appliedteamins.com](mailto:marlena@appliedteamins.com)

---

## **Yakima**

Yakima Neighborhood Health Services  
610 Yakima East Avenue, Yakima, WA 98901  
*Telefoonka:* 1-509-853-2377  
*Email-ka:* [navigators@ynhs.org](mailto:navigators@ynhs.org)

## Xarumaha Isqoritaanka ee Jooga Hageyaasha ee Degmo Ahaan

### **Adams, Ferry, Lincoln, Pend Oreille, Stevens, ama Degmada Spokane**

Wadajirka Caafimaad Wanaagsan (Better Health Together)

*Taleefanka:* 1-509-370-5605

*Iimaylka:* [bhtnavigatorstaff@BetterHealthTogether.org](mailto:bhtnavigatorstaff@BetterHealthTogether.org)

*Bogga internetka:* [www.betterhealthtogether.org/navigators](http://www.betterhealthtogether.org/navigators)

---

### **Chelan, Douglas, Grant ama Okanogan County**

Ururka Confluence Health

*Taleefanka:* 1-509-433-3383

*Iimaylka:* [sm\\_ch\\_lead\\_org@confluencehealth.org](mailto:sm_ch_lead_org@confluencehealth.org)

---

### **Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Walla Walla, ama Degmada Whitman**

Ururka Greater Health Now

*Taleefanka:* 1-509-567-5317

*Iimaylka:* [WAHBEquestions@greaterhealthnow.org](mailto:WAHBEquestions@greaterhealthnow.org)

---

### **Clallam, ama Degmada Kitsap**

Ururka Lutheran Community Services Northwest

*Taleefanka:* 1-360-452-5437 (Clallam) | 1-360-377-5511 (Kitsap)

*Iimaylka:* [clallamfamilycenter@lcsnw.org](mailto:clallamfamilycenter@lcsnw.org)

[kitsapfamilycenter@lcsnw.org](mailto:kitsapfamilycenter@lcsnw.org)

---

### **Jefferson, King, ama Degmada Snohomish**

Caafimaadka Dadweynaha e Seattle & King County

*Taleefanka:* 1-800-756-5437

*Iimaylka:* [chap@kingcounty.gov](mailto:chap@kingcounty.gov)

---

### **Kittitas ama Degmada Yakima**


Adeegyada Caafimaadka Xaafadda Yakima

*Taleefanka:* 1-509-853-2377

*Iimaylka:* [navigators@ynhs.org](mailto:navigators@ynhs.org)



**Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Klickitat, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Skagit, Skamania, Thurston, Wahkiakum, ama Degmada Whatcom**  
Xarumaha Caafimaadka Bulshada Sea Mar  
*Taleefanka:* 1-855-289-4503  
*Iimaylka:* seamaripa@seamarchc.org

**Caawimaadda Kaaliyaha Qabiilka ee Gobolka oo Dhan**  
Guddiga Caafimaadka Hinddida Mareykanka  
*Iimayl:* aura.kluever@aihc-wa.com



# Nala Soo Raac!

Waxaan ku wadaagnaa macluumaad waxtar leh iyo wararkii ugu dambeeyay ee isqoritaanka kanaaladan baraha bulshada.

-  Washington Healthplanfinder
-  waplanfinder



washington  
**healthplanfinder**

click. compare. covered.

[wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org)  
1-855-WAFINDER | 1-855-923-4633